



Developmental Disabilities Administration (DDA)
Ogeysiiska Dib-u-eegista Isqoritaanka
Notification of Enrollment Review

Taariikhda:

Magaca iyo Cinwaanka

Magaca iyo Cinwaanka Wakiilka

KU SAABSAN: Ogeysiiska Dib-u-eegista Isqoritaanka _____

Waxaad hadda ku qoran tahay Maamulka Naafonimada Koritaanka (DDA). Xeerarka Isqoritaanka DDA ayaa u baahan dib-u-eegista xaq-u-yeelashada ee waqtiyada kala duwan. Waxaan u baahanahay macluumaad dheeraad ah si aan u sii wadno isqoritaankaaga ee DDA ee hoos imaanaya mid ka mid ah shuruudahan soo socda: Naafonimo Caqliga ah, Maskax-suux, Suuxid, Ootisim, ama Xaalad Neerfo Kale **ama** Xaalad Kale oo la mid ah Naafonimo Caqliga ah. Waxaan ku soo lifaaqney Shaxda Dokumeentiyada Loo Baahan Yahay si lagu ogeysiyo macluumaadka loo baahan yahay.

Maxaad u baahan tahay in aad sameyso?

DDA waxay ku farxi doontaa in ay soo dirto macluumaadka loogu baahanyahay dib-u-go'aamintan. Haddii aad doonaysid in DDA uu macluumaadkan soo diro, fadlan u buuxi foomka oggolaanshaha ee halkan ku lifaaqan sidan soo socota:

1. Ku qor magacyada meelaha, adeeg bixiyayaasha, iyo xarumaha aannu ka codsan karno macluumaadka ku qoran foomka oggolaanshaha. Kuddar macluumaadka xiriirka ee loogu talagalay dhammaan kuwa ku qoran foomka oggolaanshaha.
2. Saxiix kadibna taariikhda ku qor foomka(foomamka) oggolaanshaha halkan lagu soo lifaaqay; kadibna
3. Foomka(foomamka) ku celi DDA.

Maxaa dhacaya haddii aadan codsigan ka soo jawaabin?

Haddii aanan warkaaga helin, waxaan dib-u-eegi doonaa xaq-u-yeelashadaada annaga oo adeegsanayna macluumaadka ku jira galka macmiilkaaga. Haddii aan jirin macluumaad waafi ah oo lagu xaqiijinayo xaq-u-yeelashada go'aanka, marka isqoritaankaaga DDA ayaa la joojin doonaa.

Fadlan sida ugu dhaqsiiyaha badan ee suuragalka ah si aad uga fogaato carqaladeyn kasta ee ku imaan kara adeegga, laakiinse aan ka dambeyn _____.

Haddii aanan warkaaga helin taariikhdan lagu qabtey, waxaan sameyn doonaa go'aaminta xaq-u-yeelashada oo ku salaysan macluumaadka ku jira galkaaga.

Haddii aad qabto wax su'aalo, la xiriir:

Magaca Maamulaha Kiiska

Lambarka teleefoonka

Cinwaan limayl

Nuqulka xeerarka dowladda ee lagu maamulayo xaq-u-yeelashada (WAC 388-823) ayaa la heli karaa marka la codsado ama waxaa laga heli karaa bartan internet-ka <https://www.dshs.wa.gov/dda/consumers-and-families/eligibility>.

Lifaaqyada: Shaxda Dokumentiyada Loo baahan yahay
Foomka oggolaanshaha (DSHS 14-012)

cc: Galka macmiilka

Shaxda Dokumentiyada Loo baahan yahay

Xaaladda naafonimada	Oggaanshaha	Dhakhtarka baarey	Diiwaannada Kale
Naafonimada Caqliga	Naafonimada Caqliga ah ama baartaanada kale ee u dhigma	Cilmi-nafsiyaqaan Shati Haysata, Cilmi-nafsiyaqaanka Iskuulka ee uu Aqoonsan Yahay Gobolka Washington; ama cilmi-nafsiyaqaanka kale ee iskuulka ee uu aqoonsan yahay Ururka Qaran ee Cilmi-nafsiyaqaanada Iskuulka	Cudurka laga helay waa in lagu diiwaangeliyaa warixinta baaritaanka iyo dhibcaha tijaabinta xirfadaha la-qabsiga ee in ka badan laba leexsanaan beegal ah oo ka hooseeya tirosinka ee la buuxiyay gudaha 36 bilood ee ugu dambeeyay.
Maskax-suux	Maskax-suux ama waxyeelada la midka ah ee soo gaarta maskaxda ee keenaysa baaralaysnimo addinka oo buuxda ama qayb ahaan ah	Dhakhtarka Shatiga Haysta; Dhakhtarka Daaweynta Dabiiciga ah ee Shatiga Haysta; ama Kaaliyaha Dhakhtarka ama Xirfadle Kalkaaliye Caafimaad oo Diiwaangashan (ARNP) oo lala xiriirinayo xirfadda neerfaha.	Macluumaadka taageeraya baahida loo qabo caawimaadda jireed ee tooska ah ee maalinlaha ah ee laba ama in ka badan meelahan soo socda: musqul adeegsiga, qubeyska, cunto cunista, lebbisashada, dhaqdhaqaaqa, ama war-isgaarsiinta.
Qallal	Qallal ama Xanuunka suuxdinta	Dhakhtarka Neerfaha ee Shatiga Haysta	Ogaanshaha cudurka ee ku saleysan taariikhda caafimaadka iyo baaritaanka neerfaha, xaqiijinta laga helay dhakhtarka ama dhakhtarka neerfaha ee suuxdinta joogtada ah in kastoo ay jiraan waxqabadyo caafimaad, iyo dhibcaha tijaabada xirfadaha la-qabsiga ee in ka badan laba leexsanaan beegal ah oo ka hooseeya celceliska la sameeyay 36 bilood ee la soo dhaafey gudahooda.
Xaaladda Autism	Xanuunka Ootismka (Autism Spectrum Disorder) ka hor 1-da Febraayo, 2022	Shati-haysta: Dhakhtarka neerfaha, Dhakhtarta waalida, Cilmi-nafsiyaqaan, Dhakhtarka Hab-dhaqanka iyo Koritaanka Carruurta; Xarunta Heerka Sare sida lagu qeexay WAC 182-531A-0200; ama Dhakhtarka Shatiga haysta, ARNP, Kaaliye Dhakhtar, ama Dhakhtar si dabiici ah u wax u daaweeyo oo la xiriira xarunta ootismka ama xarunta koritaanka.	Cudurka laga helay waa in lagu diiwaangeliyaa warixinta baaritaanka, iyo dhibcaha tijaabinta xirfadaha la-qabsiga ee in ka badan laba leexsanaan beegal ah oo ka hooseeya tirosinka ee la buuxiyay gudaha 36 bilood ee ugu dambeeyay.
Xaalad Kale oo Neerfaha ah ama Xaalad Kale oo La Mid ah Naafonimo Caqliga ah	Xanuun ku dhaca neerfaha ama koromoomyada la garanayo in uu keenno yaraanshaha xirfadaha la qabsashada iyo kuwa caqliga	Dhakhtarka Shatiga Haysta, Dhakhtarka Daaweynta Dabiiciga ah, Hiddo-side Yaqaan, ama ARNP ama Kaaliyaha Dhakhtarka ee lala xiriirinayo bukaan-eegtada neerfaha ma xarunta baaritaanka hiddo-sidaha.	Baaritaanka xaqa u leh iyo dhibcaha tijaabinta xirfadaha la-qabsiga ee in ka badan laba leexsanaan beegal ah ee ka hooseeya celceliska la dhammeeyay 36 bilood ee ugu dambeeyay.
Ogow: Foomkan waa hage guud oo kaliya oo DDA waxay u baahan kartaa macluumaad dheeraad ah ama daraaseyn. Dokumentigan waa tallaabada koowaad ee go'aaminta xaq-u-yeelashada isqoritaanka. Isqoritaanka DDA ayaa lo go'aamiyay si waafaqsan cutubka WAC ee 388-823.			